Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,

Diiwaanadayadu waxay muujinayaan in ilmahaagu haysto **Certificate of Exemption (Shahaadada Ka-dhaafitaanka) ee tallaalka measles, mumps, and rubella (MMR, jadeecada, qaamo-qashiirka, iyo rubeelada)**

Haddii uu **cudur jadeeco ka dillaaco** barnaamijkeenna, ama bulshada dhexdeeda, waaxda caafimaadku waxay uga baahan kartaa qof kasta oo aan muujin karin caddayn difaac ka dhan ah (ka hortagga) jadeecada inuu **guriga joogo ilaa 21 maalmood** kadib markii ugu dambeysay ee uu ku dhacay. Tani waxay gacan ka geysataa joojinta faafitaanka jadeecada.

Jadeecadu aad bay u faaftaa si dhakhso ah ayayna u faafi kartaa. Waxay sidoo kale sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington): doh.wa.gov/measles.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan jadeecada iyo tallaalka MMR.

Si daacadnimo leh,